



Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence



Cabot Primary School

Learn together, respect each other, achieve forever

www.cabot.excalibur.org.uk

Talaada 17^{da} Diisember 2024

Gacaliyayaal Qoysas,

Xilli wanaagsan, aad ayaad ugu mahadsan tihiin caawinaaddiina si ay carruurta u awoodaan in ay ka qeyb qaataan safarro wanaagsan oo leh khihrad. Qaar ka mid ah carruurta Fasalladeenna 2 iyo 3 ayaa lagu casumay bandhig tiyaatar oo khaas ah waqtiga dugsiga ka dib oo ku saabsanaa Little Red oo ka dhacay the Old Vic taasoo nagu dhalisay in aan ka fekerno sheekadii Little Red Riding Hood iyo kuwii xilliyada qaboowha ee keynta.

Fasalka 2 waxay ku matalaayeen Cabot bulshada dhexdeeda, waxayna bandhig ugu sameeyeen dadka da'da ah Malcolm X dhismihiisa – waana ay ka heleen!

Waxaan u riyaaqay caawinaadda aan na siisaan si aan u xaqiijinno si safarradaas ay u hirgalaan, kuwa badan oo idinka mid ah ayaa naga caawiyey goynta jidka!

Waxaa intaas dheer, in aan u riyaaqay marka aad ka soo qeyb gasheen la-tashiga waalidka. Marka aan si wadajir ah u wada shaqeyno, waxaan horumarin karnaa waxbarashada carruurta. Waxaad kale oo aad ku mahadsan tihiin ka soo qeyb galka subaxa qaxwada, gaar ahaan kuwa lala xiriiriyo Bristol Parent Carers Forum kuwaasoo ka mid ah mashruuceenna PINS (Partnerships for Inclusion of Neurodiversity in Schools.) maalinatta Isniinta 6^{da} Jannaayo. Fadlan fiiri nuqulka la soo diray ee ku saabsan nashaadaadka oo ku saabsan nashaadaadka deegaanka si qof walba uu u ahaado mashquul.

Mahadsanidiin,
Mrs L-H

Rags to Riches

Guushii sannadkii hore darteed, waxaan mar kale weydiisaneynaa dhar loo tabaruci karo Rags to Riches – Tan waa hab wanaagsan oo lagu caawiyo dunida jawigeeda iyo sidoo kale in xogaa lacag ah ay u soo saarto dugsiga. Dharka waxaa la keenaayaa 16^{da} iyo 17^{da} Jannaayo fadlan.



Taariikhaha Xusuus-Qorka

Usbuuca billaabanaaya 18.12.24 Bandhigga Qaboobaha saacadda 9:20
19^{ka} Dis – Qadada Kiristimaska
20^{ka} Dis maalinta ugu dambeysa xilliga, ka dibna waxaa billaabanaaya Fasaxa Qaboobaha 21^{ka} dugsi ma jiro.
23^{da}, 24^{ta} Dis iyo 2^{da}, 3^{da} Jan – Naadiga ciyaaraha ee dugsiga
6^{da} Jan – ka soo noqosho fasaxa.
9^{ka} Jan – Subaxa qaxwada ee Mrs L-H
20^{ka} Jan – Rags to Riches soo qaadid, ku keened bac ee dugsiga 16^{ka} or 17^{da} Jan

Imaanshaha




Celceliska imaanshaha dugsiga usbuucii hore wuxuu ahaa **93%**. **Yoolkeenna waa 96%**. Imaansho wanaagsan wuxuu carruurta siiyaa fursadooyin badan ee macquulka ah ee la xiriira waxbarashadooda, marka fadlan arrintaan gacan ka geysa. Hambalyo Fasalka **Y4** oo gaaray **96%** imaansho ah waxaa ku daba dhawaa Fasalka **3, iyo 5** oo gaaray **95%**.

Xasuusin waxaad kala socon kartaa <https://www.nhs.uk/live-well/is-my-child-too-ill-for-school/> kaasoo kaa caawin kara hagidda ku saabsan in canuggaada uu dugsiga yimaado iyo in kale marka ay xanuunno qaarkood ay haayaan.

Nabadgelyada Internetka

Fadlan sii wad in aan canuggaada ka caawisid inuu ku bad qabo isticmaalka internetka aadna xasuusid in ay qof weyn u sheegaan haddii ay la kulmaan wax walaac geliya oo ay kala kulmaan internetka.

Waxaan ognahay in carruur badan ay ku ciyaaraan ciyaaraha internetka – fadlan hubi in aad xasuusid carruurtaada in ay ahaadaan kuwo nabdoon marka ay ciyaaraayaan, sida in ay cidna la wadaagin macluumaadkooda shaqhsiga ah ayna la xiriiraan/ciyaaraan saaxiibbada ay yaqaanaan. Akhbaar dheeri ah waxaa laga heli karaa inta <https://www.nspcc.org.uk/keeping-children-safe/online-safety/> 

Shaqo-Guri

Xasuusin in carruurta ay maalin walba buug akhriyaan. Waraaqaha higgada ay guriga loo soo dhiibaa carruurtana waa in ay awoodaan in ay internetka ka geli karaan iyagoo isticmaalaaya NumBots ama TimesTable Rockstars. Barashada xirfadahaan aas-aasiga ah waxay carruurta ka caawinaayaan in ay bartaan xirfadaha adag ee manhajka. Fiiri websaydyada dheeriga ah si aad si

dheeri ah wax u baratid.



Ready, Respectful, Safe

Waxaan dhab ahaan ugu faraxsannahay in aan soo bandhigno Ready, Respectful, Safe kuwaasoo la xiriira sida aan uga hadalno filashada hab-dhaqanka carruurta. Waxaan daremeynaa in kuwaan ay cad yihiin ayna noogu oggolaanaayaan in aan ahaanno kuwo ku qotama ammaanteenna isla markaansna aan caddeeyno marka khalad uu dhaco. Waxaan og nahay in qoysaska qaarkood ay billaabeen in ay isticmaalaan luqaddaan marka ay carruurta kala munaaqashoonaayaan hab-dhaqanka. Waad mahadsan tihiin.

Waxaan jeclaan lahayn inaan warsidahaan ku soo saarno luqadaha bulshadeenna – haddii aad naga caawini kartid inaad ku tarjumbo warsidahaan luqaddaada hooyo, fadlan ogeysii xafiiska. Waxaad naga soo wici kartaa 01173772630

Cabot's core values are:
Partnership Inclusion Excellence

Websaydyada carruurta ka caawinaaya waxbarashada guriga



BITESIZE

<https://www.bbc.co.uk/bitesize/primary>



<https://www.thenational.academy/teachers/key-stages/ks2/subjects>

Topmarks

<https://www.topmarks.co.uk/>



<https://kids.nationalgeographic.com/>



<https://spaceplace.nasa.gov/>



<https://ictgames.com/>